

## **Waxay dawladdu soo rogaysaa tillaaboooyin badan oo lagu xaddidayo in ay noocyo cusub oo fayras ah Norway ku fidaan**

**Waxay dawladdu soo rogaysaa tillaaboooyin badan kuwaas oo horay ka  
dhaqangelaya, si loo xaddido loona hakiyo faafidda nooca cusub ee fayraska ee  
lagu arkay Koofur Afrika.**

- Waa in aan hakinnaa oo xaddidnaa in nooca fayraska ah ee Koonfur Afrika lagu arkay in uu Norway ku faafo. Taas darteed ayaan hadda u xoojinaynaa tillaaboooyinka dadka ka soo safraya aaggaas, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka Ingvild Kjerkol.
- Wuxaan hadda aragnaa in uu cudurkii safmarka ahaa ka sii darayo. Hay'adaha caafimaadku waxay doonayaan in la hakiyo in cudurku Norway ku faafo. Sidaas darteed ayay dawladdu soo rogaysaa tillaaboooyin soo-gelidda waddanka kuwaas oo si gaar ah loogu xaddidayo in cudurku nooga yimaado waddammadaan Afrikada Koonfureed. Waxaa la kordhin doonaa koontaroolka xudduudaha, dadka ka soo safray waddamadaasna waxaa waajib ku ahaan doonta in ay galaan hoteelka karantiilka, ayay tiri wasiirka caddaaladda- iyo heeganka Emilie Enger Mehl.

Tillaabooyinka cusub waxay ku salaysan yihii talooyinkii iyo soojeedinnadii Agaasinka caafimaadka iyo FHI.

### **Xeerar iyo talooyin cusub**

Waddamada soo socda ayaa tillaaboooyinka lagu soo rogay: Koonfur Afrika, Namiibiya, Simbaabwe, Botuswaana, Mosambiig, Lisooto, Eswatiini iyo Malaawi. Wasaaradda Arrimaha Dibeddu waxay hadda dadka kula talinaysaa in aan waddamadaan loo safrin haddii aan safarku ahayn mid aan laga maarmi karin. Si joogto ah ayaa xaaladda loo qiimaynayaa ayada oo lala kaashanayo hay'adaha caafimaadka.

Tillaabooyinka soo socda ayaa dhaqangelaya laga billaabo saqda dhexe habeenka sabtida ee 27-ka nofeembar:

- Waxaa la mamnuucayaa diyaarado toos uga yimaada dalalkaas.
- Qof kasta oo Norway yimaada soona joogay waddamadaas waxaa waajib ku ah in uu tijaabo iska qaado ka hor inta uusan soo safrin, in uu tijaabo iska qaado marka uu halkan yimaado, in uu tijaabo iska qaado 7 maalin imaashada kaddib iyo in uu galo 10 maalin oo ah karantiilka soo gelidda waddanka taas oo aan ku xirnayn in qofku caddayn karo in uu tallaal buuxa qaatay ama cudurku ku dhacay.
- Karantiilka soo gelidda waddanka waxaa lagu gelyaa hoteel karantiil. Haddii ugu horreyn 3 maalin kaddib markii aad waddanka timid lagaa qaado tijaabo

PCR ah oo cudurka lagaa waayo, markaas muddada karantiilka soo gelidda waddanka ee hartay waxaad ku dhammaysan kartaa gurigaaga ama meel kale oo ku habboon halkaas oo ay suurtaggal tahay in aadan dad kale loo dhowaan, leh qol gooni ah oo wata musql iyo kushiin ama cuntada laguu keenayo. Haddii ugu horreyn 7 maalin kaddib markii aad waddanka timid lagaa qaado tijaabo PCR ah oo cudurka lagaa waayo, markaas karantiilkii waa laga bixi karaa.

- Dadka waddamadaas soo joogay wixii ka danbeeyay 16-kii nofeembar 2021, oo Norway soo gaaray ka hor 26-kii nofeembar 2021 waa in ay sida ugu dhakhsaha badan ee suurtaggalka ah isaga qaadaan tijaabo PCR si looga baaro cudurka SARS-CoV-2. Xataa qofka tijaabada iska qaaday ka hor 26-kii nofeembar 2021 wuu iska qaadayaa tijaabada. Waxaa lagula talinayaa in ay galaan 10 maalin oo ah karantiilka soo gelidda waddanka kuwaas oo ka billaabanya taariikhdi uu qofku yimid.
  - Carruurta ka yar 18 sano oo keligood soo safra iyo diblomaasiyiinta waxay karantiilka soo gelidda waddanka ku geli karaan guryahooda ama meel kale oo ku habboon halkaas oo ay suurtaggal tahay in aan dad kale loo dhowaan, leh qol gooni ah oo wata musql iyo kushiin ama cuntada loo keenayo. Laakiin waa in tijaabo laga qaado.
  - Si loo hubiyo in dadka waddamadaas ka soo safray ay u hoggaansamaan waajibka tijaaba-qaadista iyo midka karantiilka, ayuu booliisku si gaar ah u koontarooli doonaa dadka meelahaas ka soo safray.
- Aad ayay muhiim u tahay in la raaco xeerarkan iyo taloooyinkan. Mas'uuliyad guud ayaa dhammaanteen naga saaran in faafidda cudurka la xaddido ilaa intii suuragal ah, ayay tiri Kjerkol.

### **Waxaa laga yaabaa in uu fayraskani kuwii hore ka faafi og yahay**

Nooca fayraska ah ee Koonfur Afrika lagu arkay ayaa welwel abuuray waayo wuxuu u muuqdaa mid degdeg u faafaya. Khuburadu waxaa kale oo ay ka cabsi qabaan in uu noocani awood u leeyahay in uu u gooyo difaaciilaga helay tallaalka. Lama oga in noocan fayrasku dadka ku keenayo xanuun ka badan kuwii hore. Maaddaama uu nooca fayrasku cusub yahay ayaan weli wax go'an laga sheegi karin, laakiin si fiican ayaa xaaladda loola socdaa.

### **Tillaabooyinkii soo gelidda waddanka oo la xoojiyay**

Dhowaan ayay dawladdu xoojisay tillabooyinkii soo gelidda waddanka. Halkan ayaad ka akhrisan kartaa warbixin dheeri ah oo arrintan ku saabsan. Bogga war-saxaafadeedyadii hore.

Nagala soco [Twitter](#) iyo [Facebook](#)